# In lagu noolaado Iswiidhan



Ku socota adigaaga cusub ee degan degmada Kungälv!

**Buukan yar** wuxuu ku jiheysanyahay adigaaga ku cusub Iswiidhan iyo degmada Kungälv waxaana ku jira macluumaad kuu fiicnaan kara inaad ogaato. Is-dhex galka bulshada waxay ku saabsantahay in la dareemo ka tirsanaanta bulshada. Tani micnaheedu waa in dadka oo dhan dareemaan inay ka mid yihiin bulshada Iswiidhan. Qayb tani ka mid ah waa in la ogaado xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga. Xuquuqda insaanka ayaa aasaas u ah qaar baan oo ka mid ah sharciyada Iswiidhan.





**Xuquuqda insaanka iyo sinaanta**

Sharaxaaada Qaramada Midoobay ee xuquuqda insaanka waxay ku saabsantahay in dadka oo dhan leeyihiin qiime iyo xuquuq isku mid ah. Dadka oo dhan waxay xaq u leeyihiin inay fikradooda dhiibtaan, aaminaan Ilaaha ay doonayaan oo doortaan qofka ay doonayaan inay la noolaadaan. Sharaxaadan ku saabsan xuquuqda insaanka waa inay khuseyso dhamaan dadka jooga aduunka.

Sinaantu waxay ku saabsantahay sinaanta u dhaxaysa haweenka iyo ragga. Waa in xitaa iyagu ay lahaadaan awood isku mid ah inay raad ku yeelan karaan bulshada iyo noloshooda gaarka ah. Marka qof uu qof kale ula dhaqmo si xun iyadoo ay sabab u tahay in qofkaasi yahay nin ama haweenay tani waxay tahay takoorid ah dhanka jinsiga.

**Guurka**

In xaas la noqdo micnaheedu waa in la guursaday. Dadka Iswiidhan oo dhan waa inay ahaadaan 18 sano si ay u guursan karaan. Tani waxay ku qorantahay sharciga. Sharcigan wuxuu khuseeyaa dhamaan dadka jooga Iswiidhan xitaa haddii aanay ahayn muwaadiniin Iswiidhish ah. Sida ku cad sharciga Iswiidhan waxyaabaha soo socda waxay caqabad ku yihiin in la guursado:


- Haddii adiga ama qofka lamaanahaaga ahi aad ka yartihiin 18 sano
- Haddii aad qaraabo dhow tihiin qofka aad doonayso inaad guursato
- Haddii adiga ama lamaanahaagu aad marki horeba xaas ahaydeen, ama lamaananimo diiwaan-gashan

Sharciga Iswiidhan waxaa kale oo uu mamnuucayaa guurka khasabka ah. Tani micnaheedu waa in cidnaba aanay qof kale ku khasbi karin inay guursadaan. Dadka oo dhan waa inay keligood go'aamiyaan qofka ay doonayaan inay guursadaan.

**Xuquuqda caruurta**

Dhamaan dalalka oo dhan waxaa ka jira sharciyo iyo qawaaniin ah in lagu ilaaliyo caruurta iyo dhalinyarada. Caruurta iyo dhalinyarada joogta Iswiidhan waxaa ilaaliya sharciyada

caalamiga iyo kuwa qaranka labadaba. Iswiidhan si weyn ayay muhiimad u siisaa xuquuqda caruurta iyo ka ilaalinta hanjabaad iyo dagaal. Iswiidhan waxay saxeexday qaraarka caruurta ee Qaramada Midoobay. Qaraarka caruurta waxaa ku jira qawaaniin ilaalinaya caruurta xuquuqdooda bani'aadminimo. Tani waxay tahay in caruurta laga ilaaliyo takoorida, in caruurtu xaq u leeyihiin inay sheegaan fikradooda oo la dhageysto iyo in caruurtu xaq u leedahay in laga ilaaliyo dagaal gudaha guriga. Caruurta waa in laga ilaaliyo waalidka iyo dadka waaweyn ee u geysanaya dagaal iyo ama aan ilmaha u daryeelin qaab fiican.




Shaqaalaha hey'adaha dawlada iyo shaqooyinka khuseeya caruurta iyo dhalinyarada, tusaale ahaan iskoolka, hawlaha kale ee degmada qofku deganyahay halkaas oo qofku kula kulmo caruurta, daryeelka caafimaadka iyo bukaanka iyo daryeelka ilkaha, waxaa waajib ku ah inay sida ku cad sharciga ay si dhakhso ah dacwad u gudbiyaan till adeega arimaha bulshada haddii ay iyagoo ku jira shaqadooda ka shakiyaan in caruur ay dhibaataysanyihiin.

**Dagaalka xiriirka dhow**

Dagaalka xiriirka dhow micnhiisu waa in tusaale ahaan la adeegsado awooda ah in la kantaroolo, la garaaco ama la hanjabo. Iswiidhan waxaa mamnuuc ka ah in la isku isticmaalo dagaal. Waa ku xad-gudub dadka kale xuquuqdooda bani'aadminimo waana dhacdo dembi ah. Waxaa kale oo mamnuuc ah in dagaal la isticmaalo gudaha qoyska. Tani micnaheedu waa inay mamnuuc tahay in la garaaco caruurtaada, xaaska/ninka, qofka lala noolyahay ama lamaanaha.

**Mamnuucida in garaacid loo gaysto caruurta**

Sharciga Iswiidhan waxaa ku jirta qayb lagu magacaabo sharciga waalidka. Qayb ka mid ah sharcigan waxaa lagu magacaabaa sharciga ka soo horjeeda garaacista caruurta oo wuxuu ka jiray Iswiidhan ilaa iyo 1979. Garaacis waa kelmad Iswiidhish ah oo qadiimi ah taas oo micnaheedu tahay in qofku garaaco caruurtiisa iyadoo ujeedadu tahay tarbiyadayn. Sharciga ka soo horjeeda garaacista caruurta wuxuu sheegayaa inay mamnuuc tahay in la isticmaalo dagaal jir ahaan iyo maskax ahaan ah dhanka tarbiyadaynta carurta. Dagaal jir ahaan ah waa dhamaan noocyada garaacis loo gaysto jirka. Xitaa garaacis fudud, in timaha la jiido iyo qanjiiro waa dagaal jir ahaaneed.

**Gudniinka gabdhaha**

Dalal dhowr ah waxaa lagu gudaa gabdhaha. Gudniinka gabdhaha micnaheedu waa in la jaro qaybo ka mid ah banaanka xubinta taranka ee gabadha. Gudniinka gabdhaha waa ka mamnuuc gudaha Iswiidhan. Sharcigan wuxuu sheegayaa in gudniinka gabdhaha aan la oggolayn xitaa haddii qofkani uu ogolyahay. Qofka fuliya gudniin gabar waxaa lagu xukumi karaa xarig xabsi ah. Waxaa lagu xukumi karaa gudaha Iswiidhan xitaa haddii gudniinkani lagu sameeyay dal kale.

## Macluumaadka xiriirka ee muhiimka ah

**Adeega arrimaha bulshada 0303-23 80 00**

Adeega arrimaha bulshada waxay ka shaqeeyaan ugu horeyn hawlaha bulsho ee tabaruca ah sida talo-bixinta, taageero iyo daryeel. Adeega arrimaha bulshada waxay ka shaqeeyaan taageerida caruurta iyo dhalinyarada dhibaataysan, hoyga qoyska ee lagu hayo caruurta aan waalidkood la noolaan karin, sharciga qoyska, taageero xilliga dagaalka xiriirka dhow, taageerada dadka leh dhibaato ah si xun u isticmaal maandooriye iyo dadka leh hoos u dhac awooda laxaadka ee jir ahaaneed.

**Qaylo dhaanta SOS: 112**

Haddii aad ku jirto khatar, kugu dhacay shil ama u baahantahay caawimaad deg-deg ah waxaad wacaysaa 112.

Dheeraad ka akhri www.sosalarm.se.

**Hagida daryeelka caafimaadka: 1177**

Haddii aad xanuusato una baahantahay talo iyo daryeel caafimaad. Hagida daryeelka caafimaadka waxay ka jawaabayaan su'aalahaaga, qiimeynayaan baahidaada daryeel, ku siinayaan talo oo kuu tilmaamayaan rugta caafimaadka ee saxda ah. Dhanka Hagida daryeelka caafimaadka „Vårdguiden" waxaa ka shaqeeya kalkaalisooyin caafimaad oo leh aqoon sare iyo waayo aragnimo dheer. Waxaa macluumaad la akhriyo lagu heli karaa luqado kala duwan oo badan.

Dheeraad ka akhri www.1177.se

**Booliiska: 114 14**

Haddii aad hayso su'aalo ama aad doonayso inaad wax u sheegto booliiska.

Kani waa lambarka xitaa heeganka, kuwaas oo ka shaqeeya dhibaatooyinka bulsho ee deg-dega ah xilliga fasaxyada iyo ayaamaha fasaxyada waaweyn, micnihii waa marka qaybaha kale ee adeega arrimaha bulshada aanay shaqaynayn.

Dheeraad ka akhri www.polisen.se

**BRIS, telafoonka caawimaada ee caruurta: 116 111**

Caruurta ayaa wici karta oo qof weyn kala hadli karta wax kasta.

Dheeraad ka akhri www.bris.se

**BRIS, telafoonka dadka waaweyn: 0771-50 50 50**

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan caruurtaada ama kuwa dad kale.

Dheeraad ka akhri www.bris.se

**Terrafem: 020-52 10 10**

Terrafem waa urur samafal kaas oo u shaqeeya haweenka loo gaystay dhibaato dagaal ee asal ahaan ah ajnabi. Dhanka telafoonka deg-dega ee Terrafem ayay haweenka loo gaystay dhibaato dagaal ka helaan wada-hadal taageero ah iyo talo-bixin lagu siiyo afkooda hooyo. Heeganka deg-dega wuxuu furanyahay maalmaha caadiga ah saacadaha 8-18.

Dheeraad ka akhri www.terrafem.org

**Qaabilaada xaaladadha xun ee Dagaalka xiriirka dhow, Kungälv, 0303 - 23 90 70 ama 23 90 71**

Qaabilaadan waxay bixisaa taageero bilaa kharash ah iyo daryeelka haweenka iyo raga loo gaystay dhibaato ah dagaal dhanka xiriirka dhow ah iyo haweenka iyo ragga leh dhibaato ah dagaal iyo xanaaq badan.

Dheeraad ka akhri www.kungalvskommun.se/krismottagning

**Qaabilaada Vulvamottagningen, Göteborg Angered, 031-3326902**

Qaabilaada Vulvamottagningen waxay ku taalaa isbitaalka Angereds Närsjukhus waxayna qaabishaa bukaan socodka leh dhibaato ay sababtay gudniinka gabdhaha. Waxay ahaan kartaa dhibaatooyin jir ahaaneed tusaale ahaan dhibaatooyin in la kaajo, xanuun xilliga caadada ama dhibaatooyin jir ahaan oo kala duwan.

**www.informationsverige.se**

Boggan wuxuu ku jiheysanyahay adigaaga ku cusub Iswiidhan ee si fudud oo dhakhso ah u doonaya inaad u hesho macluumaad ku saabsan bulshada Iswiidhan.

